

Ma tahay ilme ama qof da' yar ah oo isticmaala adeegyada Caafimaadka ee HSE?

Waxa aanu jeclaan lahayn  
inaanu war kaa

maqalno



Xaashida jawaabcelinta



**Fikir-  
aaga  
dhiibo**

## Waxa aanu jeclaan lahayn inaanu war kaa maqalno

### HSE waxay doonaysaa inay ku siiso daryeel iyo daaweyn badbaado leh.

Waxa aanu rabnaa inaad ku faraxsanaato adeega aad hesho iyo sida ay kuula dhaqmaan dhammaan shaqaalahaheenu. Si aad u hubiso inay tani dhacdo waxa aanu rabno inaanu ogaano waxyaabaha aad kula kulantay adeegyadeena.

Waxa kasta oo aad noo sheegto waanu ixtiraami doonaa.



**Faallo:**  
Sidee baanu isu  
horumarin karnaa?

**Bogaadin:**  
Maxaad ka heshay  
ama la dhacday?

**Cabasho:**  
Ma faraxsanid  
miyaa?  
Noo sheeg!

**La hadal qof shaqaalaha ka  
tirsan ama qofka ku siinaya  
daryeelka ama xubin shaqaalaha ah.  
Waxay rabaan inay maqlaan waxaad oran  
lahayd oo kaa caawiyaan islamarkaasba.**

Haddii aadan rabin inaad tan sameyso, waxaad sidoo kale sameyn kartaa inaad:

- Waalidkaa ka dalban ama cidda kaa masuulka ah ka dalban kartaa inay noo sheegaan waxa aad u maleynayso.
- limayl noogu soo dir **yoursay@hse.ie**
- Booqo **www.hse.ie/yoursay** si aad u buuxiso foomka onlaynka ah ee Adeegaaga Ra'yigaaga.
- Soo buuxi foomka ku lifaaqan xaashidan.
- limayl ahaan u soo dir ama boostada ugu soo dir HSE Adeegaaga Ra'yigagaaga adigoo raacaya tilmaamaha lagu baxshay foomka.

#### **ama**

- Ku soo celi sanduuqa jawaabcelinta ee yaalla xarunta caafimaadka ee aagaaga.
- U dhiib qof shaqaalaha ka mid ah.
- Dalbo oo waydii cinwaan boosta loogu soo diri karo. Waxa aad sidoo kale cinwaankaas ku soo diri kartaa warqad haddii aad rabto.
- Taleefan u soo dir **Kooxda** HSE ee Adeegaaga Ra'yigaaga laga **bilaabo** 9ka **subaxnimo** illaa 5ta **galabnimo**, Isniin illaa Jimce (marka laga reebo fasaxyada ciidaha) oo la hadal xubin shaqaalahaheena ka tirsan.
  - Taleefanka bilaashka ah 1800 424 555
  - Soo wac +353 1 642 4555 haddii aad joogto Ireland dibadeeda
- Soo wac **Kooxdeena HSELive** laga bilaabo **8subaxnimo - 8galabnimo, Isniin illaa Jimce** iyo min **9ka subaxnimo - 5ta galabnimo maalmaha Sabtida** (markalaga reebofasaxyada ciidaha).
  - Taleefanka bilaashka ah 1800 700 700
  - Soo wac +353 1 240 8787 haddii aad joogto Ireland dibadeeda

# Waxa aanu sameyn doono

## Faallo ama Bogaadin

Haddii aad bixiso faallo ama bogaadin waanu kula soo xiriiri doonaa si aanu kuugu mahadnaqno oo waxaanu tan u gudbin donoaa qofka ama adeega ku habboon.

## Cabasho

Haddii aad cabasho qabto waanu kaaga mahadnaqi doonaa inaad noo soo sheegtay cabashadaada oo waxaanu isku dayi doonaa in aanu u xallino sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah, caadiyan muddo 2 maalmo shaqeed gudaheeda ah.

Meelaha aanu waqti intan ka badan u baahano waanu kuu soo sheegi doonaa oo waxaanu ku xallin doonaa muddo 30 beri shaqo gudaheed ah. Haddii waqti dheeraad ah loo baahdo waxa aanu kugu soo warcelin doonaa 20kii maalmo shaqeedba mar.

Waanu ku faraxsanahay in aanu kuu sharraxno waxkasta oo aadan fahmin ama in aanu ka jawaabno su'aalaha aad qabto.

Wixii macluumaad dheeraada ah booqo

[www.hse.ie/yoursay](http://www.hse.ie/yoursay)



## Macluumaad aan u baahanahaysi aan cabasho u sameeyo

Si aad nooga caawiso inaanu cabashadaada ugu fiirino sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah, fadlan noo sheeg:

- Waxa dhacay.
- Goorta iyo goobta wax ka dhaceen.
- Haddii ay suurtoagal tahay, magacyada shaqaalaha ama dadka kale ee dhacda ku lug lahaa.

## Xuquuqdaada

Da'daadu intay doonto ha noqotee, waxaad leedahay xuquuq marka laga hadlayo adeegyada caafimaadka. Xuquuqahan waxa ka mid ah:

- Xuquuqda helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka.
- Xuquuqda sheegista ra'yigaaga iyo in la dhegaystora'yigaaga.
- Xuquuq cabasho haddii aadan ku faraxsanayn adeega ama daryeelka iyo daaweynta aad la kulanto.

## Macluumaadka wixtarka leh ee kale

- Macluumaadkaagu waa dhowran yahay oo asturan yahay balse waa la wadaagi karaa haddii aanu aamino inay khatar adiga ama ilmo oo qof kale oo da' yar ku soo wajahan tahay.
- Waalidkaaga/cidda kaa masuulka ah ayaa sidoo kale faallo bixin kara ama cabasho ka soo gudbin karaa adeegyadeena iyagoo adiga kuu metelaya oo markay tani dhacdona fikirkaaga ayaanu ka soo war dooni doonaa.
- Waanu ku taageeri doonaa ama ku ogeysiin doonaa taageerooyinka aad heli karto.



## Nala soo Xiriir

### La hadal

qof ka tirsan shaqaalaha maxalliga ah

### iimayl u dir

[yoursay@hse.ie](mailto:yoursay@hse.ie)

### Soo buuxi

foomka ku lifaaqan xaashidan.

### Booqo

[www.hse.ie/yoursay](http://www.hse.ie/yoursay) si aad u buuxiso  
Foomka Jawaabcelinta Adeegaaga Ra'yigaaga

### Taleefanka Bilaashka ah

Adeegaaga Ra'yigaaga ee  
HSE Lambarka 1800 424 555  
laga billaabo 9ka subaxnimo - 5ta galabnimo Isniin  
illaa Jimce (marka laga reebo fasaxyada ciidaha)

### Taleefanka Bilaashka ah

HSELive lambarka 1800 700 700  
laga billaabo 8da subaxnimo - 8da galabnimo Isniin  
illaa Jimce iyo 9ka subaxnimo - 5ta galabnimo ee  
maalmaha Sabtida (marka laga reebo fasaxyada ciidaha)

Iskaanka saar si aad  
u hesho maalmo  
dheeraad ah



Xaashida soo saaristeeda  
waxa lala kaashaday



YOUTH  
ADVISORY  
COUNCIL



Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso jawaabcelin ku saabsan dhinac kasta oo adeegyadeena ah, fadlan buuxi foomkan oo noo soo dir

### **Ku buuxinta foomka elegtaroonig ahaan**

Haddii aad rabto inaad wax isbeddel ah ku sameyso foomka, waa inaad isticmaasho noocyada dambe ee Adobe Acrobat Reader

[Adobe Acrobat Reader bilaash kagala soo deg adobe.com](https://www.adobe.com/acrobat/reader/basics.html)

### **Ku soo dirista foomka jawaabcelinta iimayl ahaan**

Waxa aanu ku talinaynaa inaad foomka PDF-ka ah buuxiso adigoo isticmaalaya laabtoob ama kombiyuutar.

Haddii aad rabto inaad isticmaasho taleefan casri ah ama taableed, waa inaad isticmaasho ablikeyshanka tifatiri kara PDF-ka oo kuugu jira aaladda aad isticmaaleyso

1. Foomka kula soo deg taleefankaaga.
2. Foomka ku fur tifatiraha PDF-keenna.
3. Dhammeystir oo kaydi foomka. Haddii aad isticmaalayso moobeel, hubi in dhammaan xogta foomku si sax loo kaydiyay.
4. Foomka iimayl ahaan ugu dir [yoursay@hse.ie](mailto:yoursay@hse.ie)

### **Ku soo dirista foomka jawaabcelinta boostada**

1. Daabac oo buuxi foomka (fadlan si waadax ah u qor ama FAR WAAWEYN KU QOR).
2. Boostada soo dhig cinwaanka: HSE Your Service Your Say, Oak House, Limetree Avenue, Millennium Park, Naas, Co. Kildare, W91 KDC2

Waxaan jeclaan inaan (fadlan sax)

Faallo bixiyo  Bogaadin diro  Cabasho gudbiyo

Waa maxay nooca adeega aad wax ku qorayso?

Xagee bay wax ka dhaceen?

Waa goorma dhacdadu?



Kelmadahaaga noogu cabbiro waxa dhacay?

A large, empty rectangular area with a light yellow background, intended for the user to provide their response to the question above.



Magac:	
Cinwaanka boostada:	
limayl (haddii la heli karo):	
Taleefan lambar:	
Moobeel lambar:	
Saxiix:	
Magaca Waalidka / Masuulka:	
Saxiixa Waalidka / Masuulka	

### Loogu Talagalay Shaqaalaha HSE oo Keli ah

Taariikhda la helay:	
Lambarka Faallada / Bogaadinta / Cabashada:	
Goobta:	
Sarkaalka Cabashada:	